AUSCO

Barnaamijka Tilmaan-siinta Dhaqaneed ee Australia

# Qoysaska Australia

Halkan Australia waxaa jira noocyo kala duwan oo qoysas ah wayna ka baddalaan karaan nooca qoyska aad taqaaney.

**Qoysaska Australia qaybo badan bay ka kooban yihiin.** Kuwaasna waxaa ka mid ah qoyskii hore ee aabaha, hooyada iyo carruurta hase ahaatee qoysas badan waxay ka koobnaan karaan waalidka-labaad iyo carruur-labaad; waalid xannaaneeyaal ah iyo carruur; carruur walaalaha ah oo is-daryeelaya; waalidiin isla jinsi ah iyo awooweyaal ama ayeeyoyaal daryeelaya carruurta ay awoowaha ama ayeeyada u yihiin. Waxaa hadda guud ahaan soo badanaya inay jiraan qoysas ah waalid-keli ah.

**Qoysaska Australia baaxad kasta ayey noqon karaan.** Qoysas badan waxay leeyihiin laba carruur ah ama ka yar isla markii kuwa kale ay yeelan karaan saddex ama afar carruuur ah. Haween badan waxay yeeshaan ilmahooda kowaad markay jiraan soddomeeye ayadoo labada wadeyna ay doortaan inaysanba carruur yeelan.

**Dhammaan dadka Australia uma noola sidii qoysas ballaaran.** Waalidiinta gaboobey badanaa waxay u-nool yihiin keli ama guryo gaar ah oo daryeela dadka waayeelka ah (oo badanaa loo yaqaan 'guryaha howlgabnimada').

**Raga iyo haweenku way wada noolaan karaan ayagoon is-qabin.** Sidaasna waxaa loo yaqaan xiriirka-gashaantiga (or 'de facto') waana mid bulsho ahaan iyo sharci ahaanba loo aqoonsan yahay.

**Dadka Australia waa u xor inay guursadaan dadka kasoo kala jeeda kooxaha qawmiyadaha, diinta ama jinsiyadaha kala duwan ah.** Waxaad u baahan tahay inaad 18 sano ka weyn tahay si aad u-guursato, si kastaba ha ahaatee, maxkamaduhu way ogolaan karaan guurarka ku dhaca xaaladaha gaarka ah haddii mid ka mid ah dadka uu jiro 16 ama 17.

**Guurarka Laysku-doono waa laga ogol yahay Australia, hase ahaatee guurarka laysku-qasbo waa sharci-darro.** Maaddaama labada qof ay doonayaan inay is-guursadaan ayna ka weyn yihiin da'da 18 sano way isguursan karaan. Cidna laguma qasbi karo inuu guursado.

**Waa wax sharci-darro ah in la yeesho wax ka badan hal nin ama hal naag isla-waqti qura.**

**Furriinku waa mid guud oo laga aqbalo bulshada dhexdeeda.** Waxaa caadi u ah dadka inay mar labaad is-guursadaan ka dib furriinkii.

**Badiba haweenka Australia waxay ka shaqeeyaan dibadda guriga.** Niman badan waxay kaalin firfircoon ka qaataan caawinta guriga dhexdiisa, tusaale ahaan ayagoo soo-dukaameeya alaabta, wax-kariya, nadiifinta iyo daryeelidda carruurta. Xaaladaha qaarkood ninka ayaa guriga joogi kara si uu ilaaliyo carruurta iyo guriga inta haweentu soo shaqaynayso.

**Kureyadu waxay badanaa sameeyaan shaqo waqti-dhiman ah si ay lacag u-shaqeeyaan ayna bartaan xirfadaha cusub.** Taasi waxay siisaa waayo-aragnimo qiimo leh iyo fursadda inay lacag soo shaqaystaan, haddii loo baahdo, si ay qoyska uga caawiyaan inay bixiyaan biilka.



Boggan si ula kac ah ayaa loo baneeyey

Australian Government
Department of Social Services

Oo ay bixisay Haya'dda Caalamiga ee
Socdaalka ayadoo ka wakiila Wasaaradda
Australia ee Adeegyada Bulshada

IOM • OIM